

WAXAA LAGAARABAA JAWAABO: WAREYSIYO WAALIDKA LAGA QAADAYO CAAFIMAADKA DHIMIRKA CARRUURTA

Xarunta Wada-shaqeynta Caafimaadka Dhimirka Carruurta ee Degmada Hennepin County (HCCMHC) waxay wareysiyo ka qaadeysaa waalidka iyo dadka carruurta daryeela ee ay u joogaan carruur lagu caawiyo caafimaadka dhimirka. Waxaa la rabaa jawaabaha qoysaska, oo waa wax lagu hagaajin doono hawlahaa caafimaadka dhimirka ee carruurta.

WAALIDKA & DARYEELAHA - NOO SHEEGA WAXAAD OGTIHIIN!



Waxaan rabnaa in aad noo sheegtaan sida uu yahay caafimaadka dhimirka ee ilmahaaga oo waa wax qeyb ka ah hawlahaa caafimaadka dhimirka carruurta.

Yaa Ka Qeybqaadan Kara?

Waalid kasta ama daryeele kasta oo (A) ku nool Degmada Hennepin ama ama ilma loogu daaweyyo xarunta caafimaadka dhimirka ee Degmada Hennepin, & (B) in ay ilmaha (da'doodu tahay 0 ilaa 21 sano) oo waa in ay tahay markii ugu horreysay ee lagu arkay xanunka dhimirka 5-tii sano ee la soo dhaafay.

Arrimaha Wareysiga

Wareysiyadu waxa ay qaadan doonaan qiyaastii 45 daqiqadood. Marka laga jawaabo su'aalaha oo dhan waxaa qof kasta la sii doonaa \$25 oo ku jirta kaar ah Target ama Walmart gift card. Waalidka ama dadka carruurta daryeela waxaa loo keenayaa turjubaan qofkii raba oo aan afka Ingiriiska si fiican ugu hadli karin.



Ma rabtaa?

HALKAN ISKA DIIWAANGELI



HENNEPIN COUNTY
CHILDREN'S MENTAL HEALTH
COLLABORATIVE

Su'aalo? Kala soo xiriir Margaret hcplg@yahoo.com

XARUNTU WAXA AY TAHAY

Xarunta Wada-shaqeynta Caafimaadka Dhimirka Carruurta ee Degmada Hennepin County (CMHC) waa goob loogu talagalay bulsha kasta iyo kooxo wakiil ka noqda bulshada oo dhan si ay saameyn ugu yeeshaan horumarka iyo hawlgallada socda oo la rabo in si waxtar leh loogu helo daaweynta dhimirka ee degmada Hennepin County. Xarunta CMHC waxay sameyneysaa horumarin ah adeegyo hal-abuur leh iyo hagaajin tayo joogto ah oo lagu sii wado daawada dhimirka carruurta iyada oo la cuskanayo hab ku dhisan mabaadii'da daryeelka iyo cilmi-baaristii ugu dambeysay ee adeegga caafimaadka dhimirka carruurta; iyo in lala shaqeeyo Adeegga Wada-shaqeynta Qoyska oo ah hawl ka socota degmada Hennepin County oo dhan.